

Maxaan u dooranayaa wakiil uu magacaabay dacwooduhu?

Dacwoode waxaa dhici karta in uu u baahdo, ama rabo, qof ka caawiya in uu codsado faa'iidooyinka Fasaxa Lacagtiisa La bixiyo. Wakiil wuxuu sidoo kale kaa caawin karaa sheegashadaada ka dib marka aad soo dirto iyada ama aan ansixino iyada.

Maxay yihiin shuruudaha loogu talagalay qofka aan u doorto wakiil ahaan?

Waa in uu:

- Ugu yaraan yahay 18 jir
- Fahamsan yahay mas'uuliyadaha wakiil uu magacaabay dacwooduhu

Muxuu wakiilkayga uu magacaabay dacwooduhu qaban karaa?

Wuxuu:

- Kuu codsan karaa faa'iidooyinka
- Heli karaa macluumaadka aad u dirtay Fasaxa Lacagtiisa La bixiyo
- Heli karaa macluumaadka ku saabsan faa'iidooyinka Fasaxa Lacagtiisa La bixiyo ee aad heshay ama heli doonto
- Heli karaa macluumaadka ku saabsan go'aano la sugayo ama la soo saaray oo laga gaaray sheegashadaada Fasaxa Lacagtiisa La bixiyo
- Macluumaad siin karaa Fasaxa Lacagtiisa La bixiyo oo loogu talagalay adiga, oo uu ka mid yahay macluumaadka aan u baahanay si loo dhammeystiro sheegashadaada loogu talagalay faa'iidooyinka
- Rafcaan ka qaadan karaa go'aanka Fasaxa Lacagtiisa La bixiyo oo loogu talagalay adiga oo hor imaan karaa dhageysi dacwadeed oo kasta oo la xiriira

Ma yeelan karaa in ka badan hal wakiil oo la oggol yahay?

Maya. Waxaan aqoonsanahay oo kaliya hal wakiil oo loogu talagalay dacwoode kasta waqti kasta oo go'an.

Maxay yihiin mas'uuliyadaha iga saaran wakiilkayga uu magacaabay dacwooduhu?

Marka aan ansixino wakiilkaaga la magacaabay, wuxuu qaadan doonaa mas'uuliyadahaaga la xiriira sheegashadaada. Wax kasta oo uu kuu qabto waxay ku xiran yihiin sharciyada Fasaxa Lacagtiisa La bixiyo oo isku mid ah oo adiga kugu khuseeya. Wakiilkaaga ayaa mas'uul ka ah in uu ku dhaqmo waxa adiga kuu dan ah. Wakiilkaagu waa in uu sidoo kale ilaaliyaa qarsoodinimada macluumaadka uu ka helo waaxda ee ku saabsan adiga.

Wakiilkayga la magacaabay ma heli karaa faa'iidooyinkayga?

Fasaxa Lacagtiisa La bixiyo faa'iidooyinkaaga ma siiyaan wakiilkaaga. Haddii aad geeriyooto waxaad weli nagu leedahay faa'iidooyin, waxaan faa'iidooyinka siin doona badbaadayaasha sida ku qoran ORS 293.490 ama sida waafaqsan sharciga gobolka.

Fiiri shaxanka soo socda si aad u ogaato waxyaabo dheeraad ah.

Su'aasha	Jawaabta
Yaa i matali kara?	Qof kasta oo aad doorato oo da'diisu tahay 18 jir ama ka weyn tahay.
Foomkee ayaan u baahanahay in aan buuxiyo?	Foomka Wakiilka uu Magacaabay Dacwooduhu
Goorma ayuu oggolaanshaha wakiilkaygu ku eg yahay?	Mid ka mid ah kuwa soo socda: <ul style="list-style-type: none"> • Muddo 30 maalmood gudahood ah laga bilaabo taariikhda waaxdu ansixisay wakiilkaaga la magacaabay, haddii uusan qofna soo dirin codsiga Fasaxa Lacagtiisa La bixiyo oo loogu talagalay faa'iidooyin aad adigu leedahay • Taariikhda aad dooratay markii aad buuxisay foomkaaga • Maalintii ugu dambaysay ee sanadkaaga faa'iidada hadda haddii taariikhdani ay ka dambeyso labada kala doorosho ee ugu horreeya
Ma joojin karaa xaalada wakiilkayga?	Haa, waqti kasta ayaad joojin kartaa oggolaanshaha. Haddii aad noqoto qof aan awood lahayn ama aad geeriyooto, taasi waxay sidoo kale joojinaysaa oggolaanshaha.